

# Sida Looga Badbaado Dabka Guryaha



## Qalabka Ka Diga Qaaca

- Qalab lagu ogado qaaca oo dhawaaq sameeya si loo baxsado.
- Guri walba waa in uu qayb ku leeyahay ugu yaraan hal qalabka qaaca ka diga
- Marna ha ka saarin batteriga qalabka qaaca ka diga aan ka ahayn marka aad beddelayso.
- Qaar ka mid ah qalabka qaaca ka diga waxay qabaan batteriyaal la cusboonaysiyo. Haddii uu sameeyo dhawaaq "jiiq" ah, waa in aad batteriga ka beddesho.
- Waa in aad qalabka qaaca ka diga tijaabisaa bil walba si aad u hubsato in uu dhawaaq sameynayo.

## Cunto Kariska

- Ha ka fogaanin cuntada dabka saaran.
- Foornada nadiif ha ahaato waxaadna u isticmaashaa oo kaliya in aad cuntada ku kariso.
- Haddii uu subag/saliid ka kaco dab, demi kaddibna dabool dul saar weelka. Biyo ha ku shubin dabka!

## Kuleyliyaha

- Alaabta ka fogee kuleyliyaha.
- Demi kuleyliyeysaasha la qaato marka aad tagayso ama seexanayso.
- Marna ha u isticmaalin kuleyliyeysaasha la qaato fillooyinka dhaadheer.

## Sunta Kaarbon Monogsaydh

- Qalabka qaarkiisa iyo mashiinada waxay dhalaan hawo sun ah oo aan la arki ama urin karin.
- Marna waxyaabaha soo socda ha u isticmaalin gudaha guriga, garaashka iyo meelaha kale ee bannaan, ama daaqad furan dibeddeeda: Jeneraytarka, jikada dhuxusha, cunto kariyaha bannaanada loo qaato ama makiinadaha kale ee gaaska ku shaqeeya.
- Marna ha u isticmaalin cunto kariyaha gaaska ku shaqeeya in aad guriga ku kululeyso, xittaa waqtii yar.

## Haddii uu Dab Kaco—

- Dibedda u saar dadka oo idil.
- Waxaad tagtaa halka ay qoyskaaga ku kulmaan.
- Waxaad wacdaa 9-1-1 si laguu caawiyo.
- Marna ha ku laaban guri ama dhismo uu dab ka kacay.

## Marka Aad Wacdo 911—

- Waxaad wacdaa 9-1-1 marka ay jirto xaalad degdeg ah. Waxaad isticmaashaa marka uu dab kaco, marka aad doonayso gargaar caafimaad ama booliis. Waa bilaash in la waco 9-1-1.
- Haddii aadan ku hadal af Ingiriiska, waxaad u sheegtaa qofka kaa qabto luqadda aad ku hadasho si aad u hesho qof turjubaan ah.
- U diyaar noqo in aad sheegto nooca xaaladda degdeggah ah iyo cinwaanka.

Cinwaankaygu waa :